

# Qiimo Jaban Ku Raac TriMet



Waxaad u qalmi kartaa inaad ku madhaxsato 72% TriMet, Portland Streetcar iyo C-TRAN

**\$1.25**

loogu talo galay tigidhka  
2½-saacadod ah

**\$2.50**

maalin isticmaalka

**\$28**

bil isticmaalka

## Si aad ugu qalanto

✓ Waa inaad u dhexaysaa da'da 18 illaa 64 sannadood jirka ah

✓ Waa inaad Oregon degenataa

Hadii ciwaanka ku qoran Aqoonsigaagu aanu Oregon ahayn, waa inaad sidoo kale haysataa warqad booseed, biil koronto ama heshiis kiro oo:

- magacaaga iyo ciwaankaaga hadda ee Oregon ku qoran yihiin, iyo
- hadda ah (la sameeyay 30 kii beri ee u dambeeyay)

✓ Waa inaad dakhli aad ugu qalmayso lahaataa.

Dakhliyada u qalma waxa laga heli karaa [trimet.org/lowincome](http://trimet.org/lowincome)

## Sida loo codsanayo

### 1 Iska Diiwaangeli khadka

Khadka iskaga diiwaangeli caddayntaa dakhli iyo aqoonsigaaga dawladu bixisay ee shaqaynaya [trimet.org/lowincome](http://trimet.org/lowincome).

Waxaad u baahan tahay inaad awooddo inaad soo gelin karto sawiro ama aad ka qayb geli karto wicitaan muuqaal ah si lagu qoro.

## Caddayn Dakhli

Qofka shaqsigu ahi, waa inuu kuwan **midkood** haystaa:

- WorkSource xaqiijin mushahar/shaqaalenimo
- Warqadda IRS ee hadda ama Warqad Soo Gudbin la'aaneed
- Foomka W2 ee sannad cashuureedkii ugu dhowaa
- Nuqul saxeexan oo cashuur celiskii federaalka ee sannadkan ah
- Warqadii cayrta shaqo la'aanta iyo kabka todobaadlaha ah ee la baxsho

Qoyska 2 iyo wixii ka badan ah, waa inay haystaan nuqul saxeexan oo cashuur celiska federaalka ee hadda ah ama warqadda cashuurta IRS midkood.

Si otomaatig ah ayaad u qalantaa hadii aad ka diiwaan-gashan tahay barnaamijyadan soo socda **midkood**:

- Oregon Health Plan (OHP)
- SNAP
- Taageero Tamareed (LIHEAP, OEAP, WAP)
- Qado Bilaasha/Qiimo dhiman
- Taageerada HUD
- TANF
- Employment Daycare (ERDC)

### 2 Soo qaado kaarkaaga

Aqoonsigaaga iyo rasiidhka u keen Xafiiska Tigidhada TriMet (701 SW 6th Ave, Portland), Isniin illaa Jimce, 8:30 - 5:30 p.m. Sawir ayaanu kaa qaadi doonaa oo waxaanu kuu samayn doonaa Hop card kuu gaara.

Wixii caawimaad dhanka luqadda ah wac **503-238-7433**, riix 5, oo wakiilka adeega macmiilka u sheeg luqadda aad ku hadasho.